

HABRAACA ISTICMAALAHKA KAARKA METRO MOBILITY

Aan Bilowno

Raac habraacan si aad sida ugu fiican ugu isticmaasho kaarkaaga Go-To Card.

Diiwaan Geli Kaarkaaga

Ka diiwaan gelii kaarkaaga shabakada metrotransit.org/register. Waa LACAG LA”AAN. Waxa aad ka ilaalinaysaa waxa kaarka xatooyo ama dhumiid.

Kaararka aan diiwaanka gashanayn ee Go-To Card lama bedeli karo. Haddii aad u baahan tahay bedelida kaar diiwaan gashan, waxaa dhici karta in lagaa qaado khidmad yar.

Ku Rido lacag kale

KHADKA metromobility.org Adigoo isticmaalaya kaarka amaahda*

TELEFOON 651-602-1111

(TTY 651-221-9886) Adigoo isticmaalaya kaararka amaahda *

BOOSTADA soo dhig, kaarka amaahda ama jeeg. Wac 651-602-1111 si aad boostada ugu dalbato foomka ama kala soo bax mid shabakada metromobility.org.

In ka badan 100 MEELOOD AYAA LAGU GADAA oo ay ku jiraan rugaha (Metro Transit Service Centers) ee baladka hoose ee Minneapolis iyo Saint Paul, sidoo kale, dukaamada Cub Foods ee magaalooyinka ayaa looga gadan karaa lacag cadaan ah ama kaararka amaahda. Booqo shabakada metromobility.org ama wac 651-602-1111 si aad u hesho akhbaarta goobahaan.

(RAIL TICKET MACHINE) kaga gado lacag cadaan ah ama kaararka amaahda

*Waxaa laga yaabaa in ay qaadato ilaa iyo 24 saac in in qiimaha lagu daray uu kaarkaaga soo galoo.

Bixi Kirada Rakaabka

Si aad u bixiso kiradaadda rakaabka kolka aad raacdo baska, mari uun kaarkaaga Go-To jagta ku rakibani tiirka la qabsado.

Kolka aad kaarkaaga mariso sawirka Go-To, jagtu kolkaa waxa ay sii wadi inay bii-bii tiraahdo, shaashadana waxay ku oran “Go” ama “Transfer” ka dibna nalku waxa uu isu bedeli doonaa doog. Nalka jaallaha ahi waxa uu muujinayaa in lacagta kaarkaagga ku jirtaa ay yar tahay, ayna tahay inaad tix-geliso in aad lacag ku rido kaarkaaga. Nalka Guduudani ee shaashada leh “Lacag Bixin ayaa Loo Baahan yahay” macnahadeedu waa inaysan kaarka ku jirin lacagi ama in kaarka la xiray. Hadii ay taasi dhacdo kirada bas raaca ku bixi lacag cadaan ah.

Hadii aad ku wareegayo gaadiid kale, fadlan raadi jagta Go-To Card ee baska ama jagta ku dhagan meesha tareenka laga raaco ka dibna ku taabo kaarkaaga sawirka Go-To. Wareejintu waxa ay ku jirtaa oo qayb ka tahay kaarkaaga Go-To Card.

Ka Eeg Baaqiga ku Harsan Kaarkaaga

KHADKA metromobility.org – waxaad kaloo halkan ka eegi kartaa taariikhiiyan wixii aad bixisay.

TELEFOONKU WAA 651-602-1111 (TTY 651-221-9886)

BASKA KORKIISA, baaqiga kaarka ku jiraa waxa uu soo baxaa mar walba oo aad kaarkaaga mariso jagta aadna bixiso kirada bas raaca.

Su'aalaha Inta badan La is-waydiido

Kaarkaygii waa iga dhumay ama waa la iga xaday. Maxaan sameeyaa?

Wac 651-602-1111 (TTY 651-221-9886) si loo xiro kaarkaaga, ka dibna codsokaar kale in lagu siiyo. Hadii hay'adi ku siisay kaarka, la socodsii arrinta kaarka maamulaha mashruuca kaararka ee hay'ada.

Kaarkaygu ma shaqeeynayo. Maxaan sameeyaa?

Lacag cadaan ah ku bixi kirada baas raacaaga ka diba wac 651-602-1111 (TTY 651-221-9886).

Ma u baahnahay in aan ka codsado xaashida gaadiid bedelashada hadii aan doonayo jijo kale inaan u raaco gaadiid kale sida tareenka oo kale?

Maya. Gadiid bedelashadu waxa ay ku jirtaa kaarkaaga aad markii hore ee raacida aad gadatay. Hadii aad ku bedelato jidkii hore jid lacagta kiradu ka badan tahay kii hore, sida Northstar, kaarkaagu waxa uu bixinayaa faraqa u dhaxeeyaa labada kiro marba hadii lacagi kuu jirto.

Hadii aadan kaarka isticmaalin muddo, miyuu shaqeyn doonaa?

Haa. Kaarku waxa uu shaqeyn karaa qiyaastii muddo ku dhow 10 sanno ama ilaa iyo inta muddada dhicida kaarka Metro Mobility laga gaarayo, hadba kii soo hor mara.

Kaarkaygu ma leeyahay muddo uu ku dhacayo?

Kaarkaagu waxa uu iskii u dhacaa kolka muddada ogolaanshaha ee Metro Mobility ay dhamaato.

Sidee ayaan u ilaaliyaa kaarkayga?

Kaararku waa adag yihiin, laakiin hadana waa ay nugul yihiin. Ku xafido kaarkaaga boorso ilaalis HANA xoqin, hana qalocin, hana daloolin. Boorsooyin dhowra kaararka iyo xarig lagu xiro oo qoorta la gashado ayaa la heli karaa hadii la waco telefoonka 651-602-1111 (TTY 651-221-9886).

Lagala Soo Xiriir

Metro Mobility Service Center
651-602-1111 (TTY 651-221-9886)
metromobility@metc.state.mn.us
390 Robert Street North
Saint Paul, MN 55101
metromobility.org

HEL IN ISKII LOO BUUXIYO

Abadan mar dambe ka wal-wali maysid in lacagtlu ka marato kaarkaaga

metrotransit.org/AutoRefill